Liiska Shuruudaha Ansixinta Hore ee Amaahda Guri Xalaal ah

Isticmaal Liiskan hubinta si aad u ogaato inaad codsan karto Servus Halal Mortgage. Inaad buuxiso shuruudahan ma damaanad qaadayso in lagu ogolaan doono, laakiin waxay kaa caawin doontaa inaad diyaar noqoto. Ma u qalantaa?

Horumariska/Deebaajiga Soo-gadashada

- ❍ Waxaad u baahan doontaa ugu yaraan 20% ee qiimaha guriga (tusaale, $100,000 marka guriga qiimihiisu yahay $500,000).
- ❍ Lacagta horumariska ah ee aad bixinayso waa inay ku jirtaa akoonka bangiga ee Kanada ugu yaraan 90 maalmood ka hor inta aanad soo dalban.
- ❍ Lacagaha hadiyada ah ayaa la ogolaan karaa hadii ay la socdaan cadaymo dukumintiyo ah.
- ❍ Ka hor inta aanad hore u sii wadin arimaha, waxaad saxiixi doontaa Waraaqda Rabitaanka/Daneynta lacagta horumariska ahna waa la hayn doonaa waxaana la jiri doona qareen ilaa inta uu iibku ka xidhmayo.

Dakhliga

- ❍ Waxaad u baahan doontaa inaad haysato dakhli joogto ah oo suggan si aad u awoodo bixinta deynta guriga.
- ❍ Waanu xaqiijin doonaa dakhligaaga inta lagu guda jiro codsiga, laaakiin waad sii qiyaasi kartaa Dakhligaaga adigoo isticmaalaya xisaabiyaheena Servus Mortgage Calculator ama Qalabka Ogolaansho Xaqiijiyaha Government of Canada's Mortgage Qualifier Tool.
- ❍ Hadii aad tahay qof iskii u shaqaysta, waa inaad keentaa dukumintiyo dheeraada sida cashuur celinta.

Taariikhda Deynta iyo dhaqaalaha

- ❍ Darajo deyn bixineed oo ah ugu yaraan 650 ayaa loo baahanyay.
- ❍ Aan hubin halka aan kaga jiro? Waa tan si aad [hubi oo horumari heerkaaga deyn bixinta].

Noocyada Guryaha la Ogolyahay

- ❍ Gurigu waa inuu ku yaalaa Alberta (Hadii aad kasoo guurayso gobol kale,waxa laga yaabaa inaan u baahano dukumintiyo dheeraad ah).
- ❍ Guryaha hore loo sii lahaa. (Kuma jiraan kuwa dhawaan la dhisay ama kuwa dhamaadka ku dhaw).
- ❍ Soo wareejinta deynta guryaha ee hay'adaha kale lama ogola wakhtiga hadda lagu jiro.

Maxaa la soo qaadanaya kulanka aqbalaada ka hor:

Dhamaan codsadayaashu waa inay soo xaadiraan oo ay soo qaataan:

- ❍ Laba aqoonsi oo aan dhicin oo dawladu daabacday (tusaale, Liisanka gaadhiga, baasaboor Kanadiyaan ah, Kaadhka Daganaanshaha Rasmiga ah).
- ❍ Cinwaanka hadda (iyo meelihii hore ee aad daganayd hadii ka hadda aad dagantahay wax ka yar 3 sanno).
- ❍ Faahfaahinta shaqadaada hadda (tusaae. Cinwaanka meesha aad u shaqayso, taleefan lambarka).
- ❍ Faahfaahinta goobihii aad hore uga soo shaqeesay (hadii aad meesha hadda ka shaqayso aad joogtay wax ka yar 2 sannadood).
- ❍ Ilo dhaqaale oo la xaqiijin karo (tusaae, kaadhka bixinta, waraaqda shaqaalaysiinta, waraaqda bangiga oo muujinaysa lacag aad si toos ah u dhigatay, caddeynta maalgashiga).
- ❍ Hadii aad tahay qof iskii u shaqeesta: Ogaysiisay Qiimeynta iyo TI General ee 2-dii sanno ee u danbeesay cashuur celinta.
- ❍ Lambarka Caymiska Bulshada.
- ❍ Xaqiijinta Horumariska lacagta Gadashada oo wadata taariikhda 90 maalmood. (tusaale, cadaymo bangi/maalgashi,hadiyad).
- ❍ Iyadoo ku xidhan xaaladaada, waxa laga yaabaa in lagaaga baahdo dukumintiyo dheeraada.

servus halal